# Xaashida Xaqiiqda

## FURRITAANKA

Xaashidan Xaqiiqda waxay bixisaa macluumaadka guud ee ku saabsan furritaan helida gudaha Kanada si waafaqsan *Xeerka Furriinka*. Xeerkan waxaaa lagu dabaqaa marka ugu yaraan hal lamaane oo degenaa gobol ka tirsan Kanada ama deegaan ugu yaraan hal sano ka hor inta aan lagu dabaqin furriinka.

Haddii mid uun adiga ama lamaanahaaga uu  ku nool yahay Kanada, ma heli kartid furriin sida waafaqsan *Xeerka Furriinka* Si kastaba ha ahaatee, duruufaha xadidan, waxaad awood u yeelan doontaa inaad soo af jarto guurkaaga si waafaqsan *Xeerka Guurka Madaniga ah* hadii aad buuxiso shuruuco gaar ah.

**Waa maxay furriinku?**

Furriinka waa nidaam sharci ah kaas oo lamaanaha isqaba ay waajib tahay inay maraan si ay u soo afjaraan guurkooda. Keliya lamaanaha isqaba ayaa heli kara furriinka, keliya maxkamadda ayaa siin karta furriinka. Marka nidaamka la dhameeyo, maxkamadda, waxay soo saari doontaa shahaadada furriinka ee cadaynaysa in aanad xaas ahayn.

**Sharciyadee ayaa lagu dabaqaa furriinka?**

*Xeerka Furriinka* waa sharciga federaalka ee lagu dabaqo marka lamaanaha isqaba ay codsadeeen furriin ama ay hadda ka horba isku furreen Kanada. Marka lagu daro xaaladaha loo dejiyay helitaanka furriinka, waxay ka hadashaaa arrimaha sida masruufka carruurta, masruufka xaaska iyo qaban qaabada daryeelka waalidnimo ee carruurta gudaha xaaladaha furriinka. Sharci goboleedyada ama deegaanada ayaa sidoo kale lagu dabaqi karaa arrimaha qaarkood, sida qaybinta hantida guurka.

Sharciyada gobolka ama deegaanka waxaa lagu dabaqaa lamaanaha isqaba kuwaas oo kala maqnaada laakiin laguma dabaqo furriinka, iyo lamaanaha aan isqabin kuwaas oo kala maqnaada. Sharciyadan guud ahaan waxay la mid yihiin sharciyada waafaqsan *Xeerka Furriinka*, iyagoo leh kala duwanaanshaha qaarkood. Macluumaadka sharciyada waxaa laga heli karaa Wasaarada Cadaalada ee gobolkaaga ama deegaankaaga ama Xeer ilaaliyaha Guud.

**Sideen furriinka u heli karaa Kanada?**

Si aad u hesho furriinka, waxaad u baahantahay inaad codsi u gudbiso maxkamadda gobolka ama deegaanka halka adiga iyo lamaanahaagu aad degentihiin. Foomamka codsiga furriinka iyo nidaamyada way ku kala duwanyihiin hal gobol iyo deegaan ilaa ka kale. Macluumaadka ku saabsan sida furniin looga codsado  gobolkaaga ama deegaankaaga waxaa laga heli karaa Wasaarada Cadaalada ee gobolka ama deegaanka ama Xeer ilaaliyaha Guud.

**Miyaan u baahanahay sabab si aan uhelo furriin?**

Si aad uhelo furrinka, waa inaad muujisaa inuu guurkaagu u burburay mid ka mid ah saddexdan qaab:

- adiga iyo lamaaahaagu waad kala maqnaydeen oo waxaad ku kala noolaydeen meel aan isku mid ahayn ugu yaraan hal sano; **ama**
- lamaanahaaga waxa uu ahaa jidh ahaan iyo maskax ahaa mid axmaq ah, oo ka dhigay mid aan loo adkaysan karin inaad sii wada noolaataan; **ama**
- lamaanahaaga waxa uu galay sinno.

**Ma inaan sugaa ka hor inta aanan codsan?**

Haddii aad sheeganayso inuu guurkaagu burburay sababtoo ah adiga iyo lamaanahaaga waad kala maqantihiin, maaha inaad sugto si aad u codsato, ilaa inta adiga iyo lamaanahaagu aad kala nooshihiin marka aad codsato. Si kastaba ha ahaatee, adiga iyo lamaanahaaga waa in aad kala noolaydeen ugu yaraan hal sano ka hor furriinka intaan la bixin.

Waxaad codsan kartaa wakhti kasta haddii aad sheegaynayso in guurkaagu u burburay sababo ah axmaqnimo jidhka ah iyo/ama maskaxda ah ama sababtoo ah sinno awgeed.

**Maxaa dhacaya haddii aan isku dayno inaanu sii wada noolaano mar labbaad ka dib markaan kala noolayn?**

Haddii aad codsatay furriinka ku salaysan kala maqnaanshaha hal sano ah, waad wada noolaan kartaan mar labbaad ilaa 90 maalmood si aad isugu daydaan inaad dib u heshiisaan. Haddii arrimahu aanay fiicnaan, waxaad sii wadi kartaa falkaaga furriinka sidii oo aaydaan weligiin wada qaadan wakhtigaas wada jirka ah.

**Bal ka waran haddii aan haysano carruur?**

Waa ay wanaagsantahay haddii waalidku ay ku heshiiyaan masruufka carruurta iyo qaban qabaada daryeelka waalidnimo. Marka la codsado, si kastaba ha ahaatee, maxkamaddu waxay samayn kartaa amaro ku saabsan arrimahan maadaama ay qayb ka yihiin dacwada furriinka ah.

Maxkamaddu waxay keliya bixin kartaa furriinka haddii ay ku qanacdo in si macquul ah qaban qaabada masruufka carruurta loo sameeyay carruur kasta oo guurka ka dhalatay.

**Ma awoodi karo qareenka: Halkeen caawimo uga heli karaa furriinkayga?**

Gobolkaaga ama deegaankaaga waxa uu yeelan karaa adeegyada cadaalada qoyska sida dhexdhexaadinta taasoo caawin karta adiga iyo lamaanahaaga inaad ka shaqaysaan qaar kamid ah ama dhammaan arrimahan ka hor inta aanad tegin maxkamadda.

**Naftayda wakiil ma ka noqon karaa maxkamadda?**

Sharcigu qoysku wuu adkaan karaa. Keliya uma baahnid inaad fahanto sharciyada kala duwan ee lagu dabaqo xaaladaada, laakiin sidoo kale waxaad u baahantahay inaad fahanto nidaamyada maxkamadda ee gobolkaaga ama deegaankaaga. Ka hor inta aanad go’aan ka gaadhin inaad wakiil ka noqoto naftaada, waa fikrad fiican inaad la tashato qareen si aad caawimo uga hesho arrimahaaga sharciga qoyska, xataa haddii aad la yeelato keliya hal kullan. Gobolkaaga ama deegaankaaga waxa uu lahaan karaa adeega tixraaca qareenka ee kuu gudbin kara adiga qareenka sharciga qoyska kaaaas oo bixin kara la tashi kooban si bilaash ah ama qiimo raqiis ah.

**Goorma ayuu furriinku dhaqan galaa?**

Xaaladaha badankooda, furriinku waxa uu dhaqan galaa 31 maalmood ka dib marka garsoorahu ansixiyo furriinka. Ka dib marka maxkamaddu bixiso furriinka, lamaanayaasha hore waxay codsan karaan shahaadada furriinka iyagoo xaqiijinaya furriinka iyo taariikhda ay dhaqan gashay.

**Sideen ku helaa nuqulka shahaadadayda furriinka ah?**

Si aad u hesho nuqulka shahaadadaada furriinka ah, ama macluumaad kale ee ku saabsan furriinkaaga, waxaad u baahantahay inaad la xidhiidho maxkamadda samaysay furriinka.

Haddii aanad hubin maxkamadda samaysay furriinkaaga, waxaad ku ogaan kartaa addoo la xidhiidhaya Diiwaanka Dhexe ee Dacwada Furriinka. Xafiiska diiwaanka kuma siin karo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan furriinka ama nuqulka shahaadadaada furriinka. Xafiiska diiwaanku waxa uu ku siin karaa cinwaanka maxkamadda samaysay furriinka iyo lambarka tixraaca si uu maxkamadda uga caawiyo inay hesho diiwaankaaga.

Si aad ula xidhiidho Xafiiska Diiwaanka:

- wac 613-957-4519 ama, dadka aanu maqalkoodu wanaagsanayn oo keliya 1-800-267-7676; ama
- buuxi Foorma Raadinta Codsiga oo u dir cinwaanka ku yaala foomka.

Fadlan hubso inuu kuu diyaar ahaado macluumaadka soo socda marka aad wacdo:

- Magaca buuxa iyo taariikhda dhalashada ee labbadiinaba adiga iyo lamaanahaagii hore; iyo
- Taariikhda aad guursatay.

***Baro waxbadan oo ku saabsan macluumaadka xorta ah ee ku saabsan furriinka iyo kala maqnaanshaha laga heli karo Cadaaladda Canada fiidyowgan gaaban, ama booqo websaydkayaga:***

***Canada.ca/family-law***

**Afeef:** Tani ma ahan qoraal sharci ah oo ma bixinayso talo sharci ah. Maadaama sharciga qoysku u adkaan karo, caadi ahayn waxay u fiicantahay shakhsiyaadka inay helaan talo ku saabsan xaaladooda oo ka timid qareenka sharciga qoyska. Qareenadan ayaa ah meesha ugu wanaaagsan ee aad ka heli karto talo sharci oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka. Ururada qareenada ee gobolada iyo deegaanka badankoodu waxay bixiyaan Adeegyada Gudbinta Qareenka. Qareenada qaarkood waxaa laga yaabaa inay bixiyaan la tashi hore oo bilaash ah ama mid raqiis ah, ama shakhsiyaadka ayaa go'aan ka gaadhi kara inay dhowr jeer la tashadaan qareen si ay uga caawiyaan dhowr dhinac oo kamid ah xaaladooda gaarka ah